


SHARUUDAHA TALAALKA

Gobolka Ohio wuxuu rabaa in caruurta la talaalo haddii lagu qoro xanaanada dugsiga dadweynaha ama dugsiga gaarka loo leeyahay,

Fadlan Uu Gudbi Diiwaanka Talaalka Diiwaan Gelinta

ARDAYDA XANAANADA WAXAY U BAAHAN YAHIIN:

1. **Hep B** (Cagaarishowga B)
3 qiyaas ayaa loo baahan yahay - waxaa lagu qaadan karaa 6 bil si loo dhameysto
2. **MMR** (Qaamoo qashiir, jadeeco, jadeecada jarmalka)
2 qiyaas ayaa loo baahan yahay, qiyaasta kowaad waxaa la siiyaa dhalashada kowaad ama kaddib.
3. **DtaP/DT Tdap/Td** (Gowracato, xiiqley, tetano)
5 qiyaas ayaa loo baahan yahay, Haddii qiyaasta 4^{aad} la siiyay ugu yaraan 6 bilood kadib qiyaasta 3^{aad}, iyo maalinta 4^{aad} ama kadib, qiyaasta 5^{aad} looma baahna.
4. **IPV** (Dabayl)
3 qiyaas ama ka badan ayaa loo baahan yahay: qiyaasta ugu badan waa in la siiyo dhalashada 4^{aad} ama kaddib.
5. **VARICELLA** (Busbuska) ama taariikhda cudurka
2 qiyaas ayaa loo baahan yahay, qiyaasta 1^{aad} waa in la siiyo dhalashada kowaad ama kaddib. Haddii ardayga uu qaaday cudurka, xaqijinta/taariikhda waxaa bixin kara takhtar ama waalid.



**FADLAN HUBSO DIIWAANKAADA
AMA KA HUBSO TAKHTARKA QOYSKAADA**

TALLAALDAA WAXAA LAGAGA HELI KARAA WAAXDA CAAFIMAADKA DEEGAANKAAGA
BALLAN KALIYA
(SI AAD U HESHID MACLUUMAAD BADAN)

Westerville iyo Gahanna: 614-525-3719/ Columbus: 614-645-8180 / Degmada Delaware: 740-203-2040

Dib-loo-eegay 12/7/2022.

SAACADAHA RUGAHA TALLAALKA

(MARKA HORE WAC SI AAD U XAQIJIISO
SAACADAHA)

WAAXDA CAAFIMAADKA COLUMBUS (COLUMBUS HEALTH DEPARTMENT)¹

RUGAHA CAAFIMAADKA EE LAYSKA TAGO BALLAN LA'AANTA

614-645-8180

<https://www.columbus.gov/publichealth/programs/immunization-program/>

240 Parsons Avenue
Columbus, OH 43215

Isniin, Khamiis, Jimce: 8:00 subaxnimo- 4:15 galabnimo (Haddii aad bukaan cusub tahay, imow kahor 3:00 galabnimo)

Talaado: 10:00 subaxnimo- 6:15 galabnimo (Haddii aad bukaan cusub tahay, imow kahor 4:30 galabnimo)

Arbaco: 8:00 subaxnimo- 11:00 subaxnimo

La imow: Aqoonsiga waalidka ama qoraalka ogolaanshaha waalidka haddii waalidku aanu diyaar u ahayn inuu yimaado iyo diiwaanka tallaalka

Turjumaan Isbaanish ah ayaa jooga goobta

Rugta caafimaadka waxay ku taallaa Dabaqa 1aad

BALLAN AYAA SHARDI AH GUDDIGA CAAFIMAADKA DAGMADA FRANKLIN (FRANKLIN COUNTY BOARD OF HEALTH)²

Ballan ayaa Loo baahan yahay

614-525-3719

<https://healow.com/apps/provider/-franklincountypublichealthclinic-2410094>

280 E. Broad St.
Columbus, OH 43215

GUDDIGA CAAFIMAADKA DAGMADA DELAWARE (DELAWARE COUNTY BOARD OF HEALTH)³

Iska tagida ballan la'aanta ah ayaa la heli karaa; Ballan ayaa La doorbidayaa

740-203-2040

<https://delawarehealth.org/immunizations/>

3 W. Winter St.
Delaware, OH 43015

-
-
- **Ma jiro ilmo loo diiday adeegyada sababtoo ah inuusan bixin karin lacagta**
 - Dadka waaweyn waxa lagu dalacaa tallaalka
 - Waalidka ama qofka mas'uulka ka ah waa in uu la imaadaa aqoonsi leh sawir oo shaqaynaya
 - Ka hubi websaytka caymisyada la aqbalay iyo kharashka lagu dalaco
 - Kaarka caymiska waa in la soo bandhigaa wakhtiga adeegga, haddii caymisku jiro
 - La imoow diiwaanka tallaalka ee hadda jira; Xafiiska dhakhtarku wuxuu fakis ahaan ugu diri karaa diiwaanka waaxda caafimaadka